Ka-tanaasulaada Tijaabada Medicaid ee 1115 ee Oregon: Tubta Xaqsoorka Caafimaadka

Gobolka Oregon wuxuu dib-u-cusbooneysiintiisa Ka-tanaasulaada Tijaabada Medicaid ee 1115(a) ee soo socota u adeegsanayaa tub lagu abuurayo xaqsoorka daryeelka caafimaadka ah. Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay dadwaynaha ka heleen codsi ah in OHA ay dib-u-cusboonaysiinta ka-tanaasulaadan u isticmaasho si ay u hirgelin lahayd nidaam daryeel caafimaad oo xaqsoor leh. Sidaas darteed, OHA waxa ay u soo jeedinaysaa dawladda federaalka isbeddelada siyaasadeed ee aan aaminsanahay in ay abuuri doonaan nidaamyo caafimaad oo cusub, sidoo kalena ay beddeli doonaan cunsuriyadda taariikhiga ah iyo kuwa haddeer jira ee sababay xaqsoor la'aanta caafimaadka.

Hadafka guud ee ka-tanaasulku waa in la hormariyo xaqsoorka caafimaadka, oo ay ku jirto la jaanqaadida mudnaanta/ahmiyadaha iskaashatooyinka Qabiilka, iyadoo:

La kordhinayo helitaanka joogtada ah ee xaqsoorka leh ee caymiska	La wanaajinayo natiijooyinka caafimaadka iyadoo la nidaaminayo Kala-guurka nolosha iyo caymiska	Loo guurayo miisaaniyad guud oo ku salaysan qiime, lana dhiirigelinayo daryeel xaqsoor leh	La wanaajinayo caafimaadka iyadoo loo marayo maalgalinta xaqsoorka ee diiradda la saaray ee ay hogaaminayaan bulshooyinka

Kordhi caymiska joogtada ah oo xaqsoorka leh
Habka kaliya oo ay dadku ku heli karaan daryeelka ay u baahan yihiin si ay caafimaad-qab u ahaadaan waa inay si joogto ah oo xaqsoor leh u helaan caymiska daryeelka caafimaad. Waxaan ognahay in dadka midabka leh iyo bulshooyinka ay sida aadka ah u waxyeeleeyaan cadaalad darada bulsheed ay leeyihiin heerarka caymiska caafimaad oo hooseeya. Habkayagu wuxuu doonayaa inuu baabi'iyo xaqsoor la'aanta iyadoo la adeegsanayo istaraatiijiyado caymiska iyo adeegyada lagu gaarsiinayo cunug kasta iyo qaangaar kasta oo u-qalma oo Oregon jooga. AKHRISO WAX DHEERAAD AH

Wanaaji natiijooyinka caafimaadka adiga oo hagayo xilliyada isbeddelada nololeed iyo kuwa caymiska
Xog ayaa waxay muujinaysaa in xubnaha dadka halista sare leh ay inta badan lumiyaan caymiska iyo helitaanka daryeelka inta lagu gudajiro xilliyada isbeddelada nololeed iyo xilliyada u kala-wareega nidaamyada, sida xabsiga ama isbitaalka gobolka. Carqaladayntani/isbeddeladani waxay kharash badan ugu fidhiyaan qofka iyo nidaamkaba. Marka xirmooyin faa'iido oo gaar ah oo ay ka mid tahay fidinta u-qalmitaanka la siiyo xubnaha ku jira xilliyada isbeddelka, waxaan xaqiijin karnaa inay caymis haystaan, in la daboolo baahiyadooda waxyaabaha muhiimka ah ee gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka lana joogteeyo helitaanka daryeelka iyo daawada, taasoo ugu dambeyntii wanaajineysa natiijooyinka caafimaadka. AKHRISO WAX DHEERAAD AH

U wareeg miisaaniyad guud oo ku salaysan qiime
Marka la barbardhigo gobolada kale, gobolka Oregon wuxuu lacag badan ka kaydistay habkayaga ku aadan Medicaid. Moodheelkayada CCO-yada waa mid hal-abuur leh oo kharashkiisu wax-ku-ool yahay. Si aan u joogteyno una dhisno guulahayaga, waa in aan sii wadnaa dhisida nidaam abaalmarinaya kharash-gareynta xaqsoorka caafimaadka iyo wanaajinta caafimaadka bulshooyinka beddelkii kharash lagu ku bixin lahaa hab-raacyada caafimaadka iyo adeegyada oo keliya. AKHRISO WAX DHEERAAD AH

Dhiirigeli daryeelka xaqsoorka leh
Moodheelkayaga daryeelka isku-duwan wuxuu ku dhisan yahay dhiirigelinta tayada iyo helitaanka. Xubnaha OHP iyo xubnaha bulshada ayaa in badan noo sheegaan in xaqsoorka ay noqoto waxa dhammaan nidaamyada ay diirada saarayaan. Waxaan dib-u-eegi doonaa cabbiraadahayada CCO si aan diirada u saarno tayada dhaqameed iyo helitaanka adeegyada caafimaadka iyo si aan sidoo kale u abuurno cabbiraadyo cusub oo xaqsoorka ku salaysan oo ku saabsan waxqabadka CCO looguna talagaly waxyaabaha gacanta ka geysta caafimaadka. Markaan qaadno tillaabooyinkan waxaan horumar la taaban karo ka gaari karnaa in nidaamka aan u naqshadeyno qaab ku aadan natiijooyin caafimaad ee xaqsoorka leh. AKHRISO WAX DHEERAAD AH

Wanaaji caafimaadka iyadoo loo marayo maalgalinta xaqsoorka diiradda la saaray ee ay hogaaminayaan bulshooyinka
Nidaamkayagu wuxuu si weyn u maalgelin karaa hababka ku salaysan bulshada si wax looga qabto waxyaabaha gacanta ka geysta go'aaminta caafimaadka ee keena xaqsoor la'aanta caafimaadka. Markii la sameeyo maalgelin xaqsoorka diiradda saarayso, waxaan dhaqaalaha iyo awoodda go'aan qaadashada ku celinaynaa bulshooyinka maxalliga ah. Haddii diirada la saaro xalalka ay bulshada hogaamineyso, waxaan aaminsanahay inaan u adeegsan karno maalgalintan wax ka qabashada caqabadaha waaweyn ee ku gaadaaman caafimaadka iyo xaqsoorka caafimaadka. AKHRISO WAX DHEERAAD AH

La jaanqaad ahmiyadaha iskaashatooyinka Qabiilka
OHA waxa ka go'an inay la shaqayso sagaalka Qabiil ee fadaraalku aqoonsan yahay ee Oregon, iyo Barnaamijka Caafimaadka Hindida Magaalada (Urban Indian Health Program (UIHP)) si ay u aqoonsato nidaamyo lagu caawinayo hubinta in ujeedooyinka daryeelka caafimaad ee Qabiileed la gaara iyadoo la xushmaynaya dhaqamada soo jireenka ah ee qabiileed lana xoojinaya xiriirka dawladaha ee ka dhexeeya waddamada madaxa bannaan iyo gobolka.

OHA waxay kalsooni ku qabtaa in fikradahayaga siyaasadeed ay horseedi doonaan Dib U-cusboonaysiinta Ka-tanaasulaada Tijaabada ee 1115(a) taasoo mudnaanta siinaysa xaqsoorka caafimaadka, dhiirigelinaysa kharash-gareynta wax ku oolka ah, kuna sameyneyso Medicaid horumar waxtar u leh dadka Oregon. Dib u-usbooneysiinta ka-tanaasulaadayada waa qayb muhiim ah oo ka mid ah istaraatiijiyad gobolka oo dhan lagu isticmaalayo oo loogu talagalay in diiradda lagu saaro xaqsoorka iyadoo la kordhinayo caymiska, la wanaajinayo tayada daryeelka caafimaadka lana xakameynayo kharashyada.

OHA waxay ku saleysay fikradahaan siyaasadeed jawaab-celinta ballaaran ee dadweynaha ee dhowrkii sanno ee la soo dhaafay. Waxaan ku tiirsan nahay daneeyeyaasha iyo dadweynaha si aan wax uga qabano siyaasadaha aan soojeedinayno inaan sii wadno si aan u horumarino Qorshaha Caafimaadka Oregon innagoo adeegsanayno qaabab lagu wanaajinayo caafimaadka iyo nolosha dadka Oregon. Waxaan soo dhaweyneynaa jawaab-celinta ku wajahan siyaasadda kor lagu soo sheegay iyo sookoobista cilmi-baarista. Waad nala soo xiriiri kartaa wakhti kasta si aan noola wadaagto fikradaada adoo adeegsanaya iimaylka 1115WaiverRenewal@dhsoha.state.or.us ama adoo ka qaybgalaya kulan dadweyne si aan u bixiso faallooyin. Jadwalka kulamada dadweynaha ayaa laga heli karaa bogga mareegtayada Oregon.gov/1115WaiverRenewal.

Qeexitaanka xaqsoorka caafimaadka Oregon

Oregon waxay aasaasi laheyd nidaam caafimaad ee abuuro xaqsoorka caafimaadka markii dadka oo dhan ay gaari karaan filashadooda caafimaadka buuxo iyo fayo qabka oo aan hoos loogu dhigin jinsiyadooda, qowmiyada, luuqada, curyaannimada, da'da, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, heerka bulshada, xaduudaha ka midka ah bulshooyinkaan ama aqoonsiyada, ama xaaladaha kale ee bulsha ahaan loo go'aansaday.

Gaarista xaqsoorka caafimaadka waxay u baahantahay wada shaqeynta joogtada ah ee dhammaan gobolada iyo waaxyada gobolka, oo ay ku jiraan dowladaha qabiileedka inay sheegaan:

- Baahinta simman ama dib u qeybinta kheyraadka iyo awoodda; iyo
- Aqoonsashada, dib u heshiisiinta, iyo saxitaanka cadaala darooyinka taariikhiga ah iyo kuwa haddeer jira.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.